Talyaaniga

# WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD KA OGAATO DIB-U-DEJINTA

## CODSADAYAASHA ILAALINTA CAALAMIGA AH



**Ogow. Buug-yarahan wuxuu xambaarsan yahay macluumaad muhiim kuu ah. Haddii uu jiro wax aad fahmi waydo , waxaad weydiin kartaa sarkaal si uu kuugu sharxo.**

SOMALI

# TUSMADA


Waa maxay dib u dejin? 3

Haddii lagu doorto, waddankee ayaa laguu wareejin doonaa? 4

Maxaa lagaa doonayaa haddii laguu doorto dib-u-dejin? 5

Maxaa dhacaya haddii aanad la shaqeyn masuuliyiinta? 5

Maxaa dhacaya hadii xubin qoyskaaga kula socdo? 6

Ma la qaadi doonaa wareysi ka hor inta aan dib-u-dejinta la sameyn? 6

Maxaad sameyn kartaa haddii aad diidid go'aanka wareejinta? 7

- Racfaanka leh saameyn hakad iyo racfaanka dhammaystiran oo isku jira -
- Racfaanka leh saameyn hakad iyo racfaanka dhammaystiran oo kala go’an -

Intee in la’eg ayuu nidaamka dibu-dejintu qaadan karaa? -

Maxaa dhici doona ka dib dib u dejinta? -

## WAA MAXAY DIB U DEJIN?

Waddamada ku jira Midowga Yurub iyo 4 waddan oo kale waxay isku raaceen sharci guud oo loogu magac daray Xeerka Maareynta Qaxootiga iyo Socdaalka (AMMR). Sharcigan wuxuu ka caawiyaa go'aaminta midkee ka mid ah wadamadan ka masuula baadhista codsiga magangalyo doon. Waddamadan waxaa loo yaqaan waddamada EU+ .



Haddii waddan uu mar qura helo tiro badan oo codsiyo magangelyo caalami ah oo aanu maareyn karin, waddamada kale ayaa ku caawin kara siyaabo kala duwan. Qaar ka mid ah codsadayaasha waxaa loo wareejin karaa waddan kale. Tani waxa loo yaqaan dib u-dejin.

Haddii xaaladdan ay dhacdo, codsigaaga magangalyo waxaa laga yaabaa inuu waddankani aanu ku eegin. Kaliya 26 ka mid ah waddamada EU+ ayaa hadda ka qayb qaadan kara dib-u-dejinta waddamada kale.

**MUHIIM! Waxaad hadda ku sugan tahay Talyaaniga kaasoo ah waddan ka tirsan EU+.**

26-ka waddan ee hadda ka qayb qaadan kara dib-u-dejinta waa: Belgium, Bulgaria, Czechia, Germany, Estonia, Ireland, Greece, Spain, France, Croatia, Italy, Cyprus, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Hungary, Malta, Netherlands, Austria, Poland, Portugal, Romania, Slovenia, Slovakia, Finland and Sweden.

5ta waddan ee "la xiriira" iyo kuwa kale ee aan ka qayb qaadan dib-u-dejinta hadda waa: Denmark, Iceland, Liechtenstein, Norway iyo Switzerland.

## HADDII LAGU DOORTO, DALKEE AYAA LAGUU WAREEJIN DOONAA?

Maamulka ayaa go’aamin doona cidda dib loo dejin karo.


Marka hore waxay hubin doonaan haddii aad **xiriir xooggan** la leedahay waddan kale.  Xiriirradan waxay ku salaysnaan karaan:

- Arrimo qoys (qaraabo dhow, sidoo kale qaraabo dheeri sida adeer, eedo, iwm.)
- Arrimo dhaqan (tusaale ahaan, haddii aad taqaanid luqadda waddankaas)

**MUHIIM!** Adigu ma dooran kartid waddanka laguu dejinayo.

Haddii aad haysato dukumentiyo caddeyn u ah xiriirkaaga waddan kale, waa inaad isla markiiba u gudbisaa maamulka.  Haddii kale, xiriirkaaga lama tixgelin doono.

Hase yeeshee, tani ma dammaanad qaadi doonto in laguu wareejinayo waddankaas.



Haddii aadan haysan xiriir xooggan oo aad la leedahay waddan kale, waxaa lagu dejin doonaa waddan ay go'aansadaan waddamada ka qayb qaadanaya dib-u-dejinta.

## MAXAA LAGAA FILAYAA HADDII LAGUU DOORTO DIBU-DEJIN?




Haddii laguu doorto dib-u-dejin, waa inaad:

- La shaqeysaa maamulka oo aad raacdaa tilmaamahooda
- Ku sugnaataa waddankani ilaa taariikhda safarkaaga, isla markaana maamulka uu kuu heli karo
- Ku sugan tahay waddanka dib laguugu dejinayo ilaa codsigaaga la eego.

## MAXAA DHACAYA HADDII AADAN LA SHAQEYN MASUULIYIINTA?

**MUHIIM!** Haddii aad diidid inaad la shaqeysid masuuliyiinta, tani waxay saameyn xun ku yeelan doontaa naftaada.




Haddii aad u safarto waddan kale adigoon fasax ka haysan mas'uuliyiinta ama aad ka guurto dalka lagu dejiyay, waxaad lumin doontaa xuquuqaha qaarkood ee magangalyo doonka. Tusaale ahaan:

- ma **heli doontid adeegyo badan iyo noocyada caawimo**
- laguuma **oggolaan doono inaad shaqeysid** ama lasocotid casharada.


## KAWARAN HADDII XUBNAHA QOYSKAAGA AH KULA JOOGAAN?

Haddii aad hadda la socoto xubno ka tirsan qoyskaaga dhow oo laguu doorto in dib laguu dejiyo, qoyskaaguna waa lagula wadi doonaa.

Xubnaha qoyska dhow waxaa loo tixgeliyaa:



- ninkaaga ama xaaskaaga
- lammaanahaaga aan guursan oo aad la wadaagto xiriir deggan



- ilmahaaga (ka yar da'da 18 sano oo aan guursan).

## WAREYSI MA LA QAADI DOONAA KA HOR DIB U-DEJINTA?



Haddii macluumaad dheeri ah lagaa doonayo, wareysi ayaa lagula yeelan doonaa. Waxa uu diiradda saari doonaa arrimaha amniga. Haddii aad u baahato inaad tagto wareysi noocaas ah, maamulka ayaa kuu sheegi doona faahfaahinta xili hore.

## MAXAAD SAMEYN KARTAA HADDII AAD DIIDID GO'AANKA WAREEJINTA?



Haddii laguu aqbalo in lagu dib laguu dejiyo, waxaad heli doontaa **goan raritaan** oo kuu sheegaya dalka lagugu rari doono.

Haddii aad ka soo horjeedo go'aanka wareejinta, waxaad maxkamadda u gudbin kartaa sababahaaga. Kani waxaa la yiraahdaa racfaan. Marka aad racfaan gudbiso, maxkamad ama guddiga garsoorka ayaa samayn doona go'aanka kama dambaysta ah.




Haddii loo baahdo, la-taliye sharci iyo turjubaan ayaa kaa caawin kara racfaanka si bilaash ah.

Waxaa jira saddex sabab oo kaliya oo lagaga qaadan rafcaanka karo go'aanka wareejinta:

- waxaad sheegaysaa in ay ka hor imaaneyso xuquuqdaada aadanaha haddii laguu wareejiyo dalkaas ka ah.
- waxaa jirta macluumaad cusub oo aan la heli karin waqtiga go’aanka wareejinta, kaas oo saameyn lahaa go’aankaas.
- qoyskaaga ayaa jooga dal kale oo aad rabto in lagula midoobiyo badalkeed

Haddii aadan ku raacsanayn go’aanka lagugu wareejinayo waddan kale, waa inaad racfaan ka qaadataa go’aankaas muddada lagu cayimay go’aanka wareejinta gudaheeda.

Xadidida waqtiga, meesha iyo sida loo gudbiyo racfaanka waxaa lagu sharxi doonaa go'aanka wareejinta ee lagu siiyay.

Waa inaad sheegtaa sababta ama sababaha aad uga soo horjeedo go'aanka laguu wareejinayo dal kale.

Waa inaad sidoo kale sheegtaa sababta ama sababaha aan lagugu wareejinayn dalka dibu-dejinta inta rafcaankaagu socdo.

Maxkamadda ayaa marka hore go'aamin doonta haddii aad sii joogi karto waddankan inta laga sugayo natiijada racfaanka, muddadaas oo socon karta illaa **1 bil.**. Tani waxaa loo yaqaan racfaanka leh saamaynta joojinta


Haddii maxkamaddu go'aansato inaadan sii joogin waddankan inta natiijada racfaanka la sugayo, waxaa lagugu wareejin doono dalka mas'uulka ka ah dibu-dejinta inta rafcaaku socdo.

Haddii maxkamaddu go'aansato in laguu oggolaado inaad sii joogto waddankan inta racfaankaagu socdo, maxkamaddu waxay isku dayi doontaa inay go'aan kama dambays ah ka gaarto in laguu wareejiyo dal kale iyo inkale 1 bil gudahood laga bilaabo taariikhda go'aanka saamaynta joojinta.

Haddii racfaankaaga la diido,waxaa laguu wareejin doonaa dalka EU+ ee mas'uulka ka ah baaritaanka codsigaaga. Wareejinta waa in la sameeyaa 4 todobaad gudahood laga bilaabo taariikhda go’aanka kama dambaysta ah ee maxkamada

**MUHIIM!** Waa inaad la shaqeysaa maamulka oo aad u safartaa waddanka laguu wareejinayo.

# INTEE INLE'EG AYUU NIDAAMKA DIBU-DEJINTU QAADAN KARAA?




Haddii aadan racfaan ka qaadanin go'aanka, wareejinta waa in la sameeyaa 4 toddobaad gudahood ka dib marka waddanka EU+ ee dib-u-dejinta xaqiijiyo codsiga.

Haddii maxkamaddu go'aamiso in aan sabab jirin oo aad dalka ku sii nagaan karto inta racfaanku socdo, waxaa laguu wareejin doonaa waddanka dib-u-dejinta inta racfaanku socdo.

Haddii aad racfaan ka qaadato go'aanka wareejinta oo maxkamaddu go'aamiso inaad ku sii nagaan karto dalka inta racfaanku socdo, wareejinta waa in la sameeyaa 4 toddobaad gudahood go'aanka racfaanka la diido. Waxaa lagu ogeysiin doonaa ugu yaraan 2 maalmood ka hor taariikhda dib-u-dejinta. Haddii racfaankaaga la aqbalo, ma lagu wareejin doono waxaana ku sii nagaan doontaa dalka.

Haddii maxkamaddu go'aamiso in aan sabab jirin oo aad dalka ku sii nagaan karto inta racfaanku socdo, waxaa laguu wareejin doonnaa waddanka dib-u-dejinta inta racfaanku socdo.

## MAXAA DHICI DOONA KA DIB DIB U-DEJINTA?

Caadi ahaan, codsigaaga magangelyo waxaa baari doona waddanka laguu wareejiyo. Haddii, ka dib marka laguu raro, la ogaado inaad leedahay xubin qoyskaaga ka mid ah oo waddan kale jooga, waxaa laguu wareejin karaa waddankaas si codsigaaga loo baadho.

Buug-yarahan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya. Keligii ma abuuro xuquuq ama waajibaad Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa bixisay qaybta ugu weyn ee agabkan, waxaana EUAA kaliya oggolaatay in la nuqulo ama wax laga beddelo buug-yarahan Waddamada Xubnaha ka ah EU. EUAA ma qaado wax mas'uuliyada ama xil ku saabsan saxsanaanta, nuxurka, dhameystirnaanta, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay bixiyeen Waddamada Xubnaha ka ah EU ama dhinac saddexaad oo mas'uul ah. EUAA iyo cid kasta oo ku shaqaysa magaca EUAA midna mas'uul kama aha isticmaalka laga yaabo in laga sameeyo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025